



## Hagista ku saabsan qaadista saamiga saxarada ee kalprotektiini (F - Calpro),


1. Waxaad si toos ugu saxarootaa weelka lagaa soo siiyay shaybaarka. Saamiga ha koo saa qaadin godka saxarada ee mus-qusha (WC-pöntöstä).




2. Qabo **qaybta buluugga ah**, waxaadna furtaa **furka guduudka ama cassaanka ah**. **Qaybta buluugga ah ha ka fujin tuyuubka saamiga!**



3. Qoriga dhuuban waxaad ku riixdaa meelo kala duwan oo saxarada ah. Sidoo kale saxarada jilicsan way soo raacaysaa qoriga. Saxarada adag waa in lagu soo xoq-xoqaa qoriga.



4. Qoriga geli oo ku riix, adioo ka sii dhex bixinaaya **qaybta buluugga ah** ee tuyuubka. Si taxaddar leh u xir tuyuubka.



- Waxaad ku qortaa taariikhdaada dhalashada iyo lambarka aqoonsiga, iyo saacadda saamiga la qaaday (Taariikhda iyo saacadda), sharootada ama warqadda yar ee macluumaadka ee lagu soo siiyay. Sharootada ku dheji tuyuubka saamiga.
- Saamiga iyo warqadda yar ee aad macluumaadka ku qortay, waxaad gelisaa bacda afka laga xiraayo.
- Saamiga waxaad gelisaa talaajadda ama qaboojiyaha, tan iyo inta aad uga soo celi-nayso shaybaarka.

### Saamiga loo qaaday sida khaldan, lama baari karo!

Iskaan saar koodka ama nidaamka astaamo adeegsiga (QR-koodi), waxaadna daawataa fiidiyowga ka hadlaaya sida saamiga loo qaado.

Faahfaahinta dheraadka ah iyo hagista waxaad ka heleysaa lambarka telefoonka ee ah: 09 471 86800, isniin-jimco, saacadda 7.00–15.30

